# Natiijada Doorashada Dadban iyo Filashada Shacabka Soomaaliya

**W/Q Axmad Cabbaas Axmad (Gacma Gaab)**

**December 26, 2016**

---

**Odhaahda Tifaftirka**: *Qormadini waa daraasad ku aadan doorashada dadban ee lagu wado in ay ka dhacdo Soomaaliya dhawaan iyo filashada shacabka. Daraasaddan waxa si wacan u soo diyaariyay una qoray Cabbaas Axmad oo barre sare ka ahaa Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Kuliyadda Dhaqaalaha 1979 -1981,* *islamarkaana ka mid ahaa gudiggii farsamo ee loo xilsaaray qorista dastuurka KMG ee Soomaaliya. WardheerNews waxa ay aad u rajaynaysaa in daraasaddani ay wax badan ku kordhin doonto dhamaan dadka u kuur gala arimaha Soomaaaliya, iyada oo ay Soomaaliya hadda ku jirto wakhti xasaasi ah.*

-------

In kasta oo ay jiraan dhaliilo badan oo lagu duro qaabka hirgelinta doorashada dadban ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya, ma muuqadaan sababo ay gebi ahaanba ku baaqan karto doorashada 2016. Sida hadda tabaabushaha doorashada baarlaamaanku u socoto, saadaashu waxay u muuqataa in doorashada xildhibaannada labada aqal la soo gabagabayndoono inta lagu jiro sannadkan 2016. Tabaabushaha la xariira doorashada Madaxweynaha waxaa la wareegi doona baarlamaanka federaalka ka dib marka xildhibaannada cusub loo dhaariyo xilka.





Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Jadwal laba bilood ah ayaa dastuurku u dejiyey in Madaxweynaha cusubi magacaabo Ra'iisul wasaare, iyo in Ra'iisul Wasaaraha magacaabani uu liiska xubnaha Golaha Wasiirrada iyo barnaamijka xukuumadda cusub uu horgeeyo Baarlamaanka si loo siiyo kalsooni baarlamaan. Marka la soo hooriyo hadalhaynta jadwalka doorashada waxaa la saadaalin karaa in hay'adaha Qaran ee kala ah Baarlamaan, Madaxweyne, iyo Gole Xukuumadeed ay yeelan doonaan jiritaan dhammaystiran, ugu dambayn, bisha saddexdaad ee sannadka soo socda gudaheeda.

Inta aan loo gudbin waxa laga fili karo natiijada doorashada dadban, qoraalkani wuxuu isku deyi doonaa in uu soo bandhigo qeexid guud oo la xariirta, hor iyo horran, waxa dawladdu tahay – **Waa Maxay Dawladi**? Qeexidda guud ee dawladda waxaa ku xigi doona iftiiminta heerka Soomaaliya ka joogto dawladnimada. Is-barbardhigidda qeexidda dawladdda iyo iftiiminta xaaladda Soomaliya waxay fure u tahay in la suureeyo inta ay le'egtahay qabyada jirta iyo waxa innala gudboon si aan higsanno dawladnimo isudhan.

Dulucda qoraalkan waa bandhigid la xariirta in Madaxweynaha la dooran doono (Haddii **ALLE** yiraahdo) laga filayo hal-abuur hoggaamineed oo horseeda Dawlad Qaran oo dhammaystiran. Ugu dambaynti, gunaanadka qoraalkani wuxuu ku saabsnyahay kaalinta dadweynaha Soomaaliya oo ay tahay in ay ku baraarugaan lagama maarmaannimada dawladnimo dhammays ah.

**1. Qeexidda Dawlad**

Asalka Dawladaha dunida ka jira oo dhan waa ka simanyihiin in si dawlad loo noqdo ay laga maarmaan tahay inuu jiro shacab ku nool dhul mucayan ah. Shacab iyo dhul keligood dawlad ma dhalin karaan haddii aaney jirin himilo lagu midaysanyahay. Marka shacab yeesho himilo uu ku midaysanyahay waxaa ka dhasha dhaq-dhaqaaq waddaniya oo ujeeddadiisu tahay inuu dawlad ka dhaliyo meel aaney hore uga jirin iyo inuu sii tabbageliyo dawladnimada marka la soo hooyo hanashadeed.

Ayada oo shuruudahaa laga duulayo, "**Dawladi waa Hay'ad uu yeesho shacab isku himilo ah, hay'adaha kale ee jiri karana kaga soocan in dawladda aan lala wadaagin ka talinta gebi ahaan baaxadda dhulkeeda iyo u talinta dhammaan shacabka ay dawladda u tahay".** Noocyada dawldaha dunida ka jira way kala geddisanyihiin waxayse ka midaysanyihiin reebbanaanta jiritaanka awood kale oo leh abaabul muuqda ama mid naban oo dibadda ka ah xayndaabka sharciyadda dawladda. Sidoo kale, dawladi waa iney leedahay awood ay dalkeeda kaga diffaacdo duullaan kaga yimaada dibadda. Si kale haddii loo yiraahdo, **"Dawladdu waa hay'adda keliya oo si xalaal ah u lahaan karta una adeegsan karta awood ciidan" (Max Waber).**


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Caynaanka hey'ad ay u dhanyihiin shuruudaha dawlad lagu noqdo waxay Soomaaliya hanatay taariikhdu markii ay ahayd 1dii Julay 1960-kii, hase ahaatee dawladdii noocaas ahayd waxay gebi ahaanba jiritaan beeshay bilawgii sannadkii 1991.

**2. Maqaam Dawlad Qaran**

Tobankii sano ee hore ee ka dambeeyey jiritaan beeliddii dawladdii qaran waxaa Soomaaliya ka socdey dagaallo miliishiyooyin ay kala hogaaminyeen qab-qablayaal dagaal. Shirar badan oo ay isugu yeereen Qarammada Midoobey, wakiillo Urur-Goboleedyo, iyo dibolomaasiyiin Dawlado daneeya Soomaaliya midkoodna lagama gaarin natiijo suurta gelin karta in Soomaaliya dib loogu soo dabbaalo dawladnimo. Ugu dambaysti waxaa la gaarey in laga quusto in qab-qablayaashi dagaalku ay ku heshiin karaan qorashe nabadeyn iyo heshiis siyaasadeed oo dhaqan-gal noqon kara.**"Heshiis kasta oo ay gaaraan qab—qablayaasha dagaalka Soomaaliya wuxuu buraa inta aaney qallalin khaddii qalmaantii ay ku saxiixeen heshiisyada ay galaan",** ayaa laga hayaa mid ka ka mid ah kuwii ka faalloonjirey siyaasadda Soomaaliya.

Sannadihii ugu dambeeyey ee qarnigii la soo dhaafay, waxaa la gaarey inuu isdhimo xawligii dagaalladii garabyada hubaysan ilaa xad la oran karo waxaa la gaarey heer kuwooda waaweyni ay yeesheen awoodo isu dheelli tiran oo aaney is muquunin karin, isla markaasna aaney ka suurtoobin in ay heshiiyaan.

Sida aan kala harka lahayn ee loo ajiibey gogooshii nabadda ee Madaxweynaha Jabbuuti u fidiyey Shacabka Soomaaliya, waxay ka marag kaceysay in fursadda keliya oo bilani ay noqotay in isla qaab beeleedki dalku u burburay laga bilaabo dib-u-hanashada dawladadnimo Soomaaliyeed. Ayaandarrada dhacday waxay noqotay in lagu sii neegaaday qaabka saami qaybsiga ee loo yaqaan 4.5 oo danta laga lahaa ay ahayd in lagu unko Hay'adihii Qaran oo dalka u tallaabin lahaa dawladnimo dhammaystiran.

Hay'adihii Qaran ee xilalka isaga dambeeyey 16-kii sano ee la soo dhaafay waxay ka simanyihiin in ay dawladnimaduba la noqotay Baarlamaan qaab beeleed ku yimaada oo Madaxweyne doorta, iyo Madaxweynaha la doorto oo magacaaaba Ra'iisulwasaare ku dhawaaqa liis gole wasiirro oo isla Madxweynuhu u dhiibo.

Hadda waxaa Soomaaliya ka jira dawlad leh maqaam dawlad Qaran, hase ahaatee aan awooddedu ku fidsanayn dalka oo dhan. Ha'y adaha qura ee leh maqaam hay'ado Qaran waa saddexda hay'adood ee kala ah: Madaxtooyo, Baarlamaan, iyo Gole Xukuumadeed oo midkoodna aanu ku tiirsanayn awood ay ku dhaqangeliyaan sharciyada ka soo baxa, siyaasadaha ay dejiyaan iyo go'aannada maamul oo ay gaaraan.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Axdiyadii Qaran ee KMG ahaa iyo dastuurka KMG ah ee hadda jira welina qabyada ah si cad ayey u qeexeen in Golaha Xukuumaddu yahay hay'adda leh awoodda fulinta ee dalka, Ra'iisul Wasaaruhu yahay mas'uulka ugu sarreeya golahaas. Qallooca ay ka soo kaban la'adahay siyaasadda Soomaaliya waxaa ugu weyn in Madaxweyanahayaashi dalka soo maray, laga bilaabo sannadkii 2000, ay kulligood noqdeen kuwa iyagu adeegsada awoodda fulinta, halkaasna ay ku baylihiyaan awoodihii dastuurku siiyey oo runtii ah kuwii lagaga soo kaban lahaa dawlad la'aanta, sida laga dheehandoono isla qoraalkan. Madaxeynayaashii xilka isaga dambeeyey waxay kaloo nuxur tireen hay'addii Baarlamaanka ka dib markii ay ka yeeleen gole isla Madaxweynuhu ka abaabulo mooshinno xilka lagaga qaado Ra'iisul Wasaare markiisa horeba magacaabane keliya ahaa. Si aan Madaxweyne loogu oogin dacwad la xarirta ku tumasho dastuur, ku tagrifalid awood, iyo dembiyo culus, waxaa si ula kac ah la isugu laday in dalku yeesho Garsoor madaxbannaan.

Guuldarrada ugu ba'an oo Soomaaliya la soo gudboonaan karta waa ayada oo hay'adaha qaran ee ka soo murbaxa doorashada dadban ay dhexdooda isku habsaamaan sidaasna ay muddada xilhayntoodu ku dhammaato ayada aanu dalku yeelan: (i) Dastuur dhammaystiran iyo sharciyo ka faracama; (ii) Garsoor Madax Bannaan iyo; (iii) Asaaski dhamman hay'adaha ku kala began adeegyada kale ee asaasiga oo ay ugu mudunyihiin difaaca dalka iyo xasilloonida gududuhu. Waxaa kalo ayaan darra noqondonta in muddada xil-hayntooda oo ku eg 2020 ay gabaabsi noqoto ayada oo aan weli la isku dubbaridin qaab doorasho oo qof iyo cod ah.



In kasta oo ay filasho xaq ah tahay, haddana waa adagtahay in affar sano gudohood lagu guuleysto in la hanto dawlad dhammaystiran. **Waxa ugu badan ee la filan karo, ayna lagama maarmaan ah in la isku baraarujiyo, waa in affarta sano ee innaku soo fool leh inta lagu jiro lagu tallabsado tubta dawlad noqoshada**. Waxaan meelna looga baxsan Karin in masu'uuliyiinta ka soo baxa natiijada doorashada dadban (xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka, Madaxwenaha la doorto, iyo Golaha Xukuumadda) ay yihiin kuwa uu saaranyahay xilka ah in ay Soomaaliya ku hoggaamiyeen tubta dawlad noqoshada. Meel kale oo laga raadiyo, sida hadda xaaladda dalku tahay, waxay u badantahay in ay tahay dhalanteed.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Inkasta oo mas'uuliyaddu tahay mid wadareed haddana waa la sii kala leeyahay. Runtu waxay tahay in ka soo kabashada dawlad la'aanta ay lagama maarmaan tahay in ay ka bilaabato meesha ay ka dhaqaaqi la'adahay, taaso ah **Xafiiska Madaxweynaha** oo noqday meesha lix iyo tobankii sano ee la soo dhaafay ay sartu ka qurunsantahay.

### 3. Tubta Hanashada Dawladnimo Dhammays ah

Xildhibaannada labada aqal ee barlammaanka Federaalka ee nasiib u yeesha inay ka soo baxaan doorashada dadban, waxaa laga filayaa in ay ku baraarugsanyihiin in ay yihiin wakiilladii shacabka. Sidaas awgeedna laga filayo in ay murashaxiinta Madaxweynaha ee dhowaan hor imandoona, ay ku kala doortaan hadba sida ballanqadyadoodu ugu kala dhowyihiin in dalku ka tallaabo xaaladda fadhiidka ah ee uu ku jirey lix iyo tobankii sano ee ugu dambeeyey.

Qof kasta oo si dhab ugu kuur gala ballanqaadyadii murashaxiinti madaxweynahu ka horjeediyeen barlamaandii KMG ahaa iyo kii ugu dambeeyey ee hadda xilkiisi dhammaaday waxaa u soo baxaysa laba arrimood.

(i) Tan koowaad ee ka soo baxaysa daraasadda noocaas waa in ballanqaadyada uu mid kasta oo ka mid ahi uu fulin doono haddii la doorto ay ahaayeen isla kuwii uu ra'isalwaaruhu ka hor jeedin lahaa baarlamaanka, marka uu ka dalbanayo in asaga iyo golaha xukuumadda ee uu soo dhiso ay helaan kalsoonida Baarlamaanka. Sugidda aminga, horumarinta adeeyada bulshada iyo dhaqaalaha, shaqa abuuridda, IWM. Waxay ka mid yihiin xilalka golaha xukuumadda oo uu hoggaamiyo Ra'iisul Wasaaruhu.

(ii) Tan labaad, Murashaxiintii Madaxweynaha ee hore xilka u tartamay, kuwii waayey iyo kuwi la doortayaba, ololayaashhoyadii doorashadu waxay u ekaayaan kuwa aan ka war hayn in dawladdii jiritaan beeshay 1991ki loona baahanyahay in dib loo jirsiiyo.

Madaxweynaha la doorandoono waxaa la gudboon inuu isu xilsaaro saddex geeddi-socod oo ma dhaafaan ah, kuwaas oo kala ah: **(i) Talinta Sharciga, (ii) Mideynta Shacabka iyo Dalka, iyo (iii) Abaabulidda Ra'ayi Caam ah.** Qaybaha soo socda oo qoraalkan waxaa lagu lafaguri doonaa saddexdaas arrimood oo a tahay in Madaxweynaha la dooran doono uu ku hoggaamiyo labada hay'adood ee Qaran ee kala ah Barlamaanka Federaalka iyo Golaha Xukuumadda iyo guud ahaanba shacabka.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

**4. Talinta Sharciga**

Inta aan loo guda gelin mowduuca waxaa muhim ah in la kala saaro **Talinta Sharciga** iyo **U Hoggaansanaanta Sharciga**. Farqiga labadaaas u dhexeeya ma aha macnaha ereyada ee waxaa ku jira nuxurka dhabta ah ee dawladnimda. Talinta sharcigu waa in mas'uuliyiinta ugu sarreeya mansabyada dawladda ay xil-gudashadooda waafajaan dastuurka iyo sharciyada kale ee dalka, marka ay ka leexdaanna ay jiraan awooddo xakameeya takrifalkooda. Ma'uuliyadda Talinta sharcigu waxay hor iyo horraan saaranhay madaxda sare ee dalka waayo dhammaan hawlwadeennada dawladdu waxay raacaan saanqaadka madaxda sare. Marka laga bayro talinta sharciga waa marka la bannaysto **Talinta Qofka,** taas oo ah marka mas'uulka ugu sarreeya talada dalka aanu u aabba yeelin sharciga wax kasta oo damaciisu siiyona geed gaaban iyo geed dheerba u fuulo sidi uu ku fushan lahaa.

U hoggaansanka sharcigu, waxay khusaysaa muwaaddininnta oo ay waajib ku tahay in ay dhawraan sharciga, haddii ay ku xadgubaanna mutaysanayaan ciqaab ku sargo'an fal-dembiyeedka eedaysane ku caddaada. Hadba inta ay le'egtahay ka fogaanshaha talinta sharciga in cagsigeeda ah ayey hoos u dhacdaa u hoggaansanaanta sharcigu.

Mar haddii mudda lix iyo toban sano ay miradhal noqonweydey talinta qofku, gooshakan waxaa danta guud ee dalka (iyo danta mas'uuliyiinta) ku jirtaa in Madaxweynaha dhowaan xilka loo dhaarin doono uu noqdo kan ugu horreeya ee u ban baxa talinta sharciga. Xarafka © ee faqradda 1aad ee Qodobka 87aad ee Dastuurka Federaalku wuxuu xeeriyey in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka uu yahay "**Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka".** Sidaas awgeed masu'uuliyadda Talinta Sharcigu waxay hor iyo horraan saaratahay Madaxweynaha. Sida Madaxweynuhu u ilaalinayo una horimarinayo dastuurka ma aha sida uu doono ee waxay ku caddahay faqradda 2aad ee isla Qodobka 87aad, taasoo u qoran, **"Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurkan iyo sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."**

Aragtida werisa in dastuurka KMG ah dalku u asteeyey madaxweynaha mansab maamuus keliya ah, sidaas awgeedna aanu wax awooda lahayn waxay uu qareentaa nooc madaxweyne oo hantida dalka ugu tagrifala sida hanti shakhsi ah oo aan loo eeggin sida xalaasha ah ee lagu mutayasto iyo sida xaqa ah ee ay ugu waajibto muwaaddinka laga qaadayo. Sidoo kale fahamka noocaas ahi wuxuu u qiil sameeyaa in Soomaaliya lahaato madaxweyne xil-magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda sida uu rabo ka yeela ayada oo aan loo eggin wax shuruud ahoo ku xiran iyo habraac loo maro. Dadka ku dura dastuurka in uu madaxweynaha ka go'odoomiyey awoodda dalka waxay u cudur daaraan in dastuurka dalku xalaaleeyo **Talinta Qofka.** Dawladnimo lagu dhaqo Tainta Qofka waa wixi ay eersatay dawadnimadi Soomaaliya, waana isla dhaqankaas tan ay ka soo kaban la'adahay.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Marka laga reebo hay'adda Garsoorka, dastuurka KMG si isu-dheellitiran ayuu u kala xadeeyey awooddaha sharci dejinta, Madaxweynaha iyo fuilinta, haddii sida qormada dastuurku tahay loo raacona ay sugnaaneyso **talinta sharcigu**. In kasta oo tafaasiisha la xariirta sida dastuurku uu asteeyey hay'adda garsoorka aanay ahayn dulucda qoraalkan, waxaa hubaala in aan la helidoonin garsoor madax bannaan haddii yagleelidda hay'adda garsoorka loo raaco sida ay hadda ugu taallo qaybta ku saabsan garsoorka ee dastuurka KMG ah. Arrimaha loo baahanyahay in lagu saxo dadaalka dib-u-eegista dastuurka waxaa ka mid ah in la saxo cilladaha ku jira qeybta dastuurka ee ku saabsan garsoorka.

Marka loo kuurgalo sida dastuurku hay'adaha Qaranka ugu kala qoondeeyey waxaa cad in Madaxweynaha dalku yahay mas'uulka ugu awood badan. Awoodda dawladnimada dal waxaa lagu cabbiraa nooca sharciyada dalku leeyahay iyo madaxda ugu sarraysa hay'adaha dhaqan geliya sharciga. Tafaasiil kooban ee awooda Madaxweynaha ee la xariira dejinta sharciyada iyo magacaabidda madaxda sare ee hay'adaha Qaranka, waxay tusaale u yihiin in run ahaanti Madaxweynuhu yahay Ilaaliyaha iyo horumarinta mabaadi'ida asaasiga ah ee dastuurka.



**(i) Awoodda Madaxweynaha ee La Xariirta Sharci Dejinta**

Awoodda Madaxweynaha ee la xariirta, "saxiixidda sharciyada Baarlamaanku ansixyo", waxay Madaxweynaha siinaysaa awoodda ah inuu Baarlamaanka ku celiyo sharci kasta oo ay ka muuqato in aanu soo marin dhammaan habraac-yadi sharici-dejinta, naxur ahaantiisana aan u adeegayn danta shacabka iyo dawladdaba. Sharci Madaxweynuhu dib-u-celiyey wuxuu dhaqan gal noqon karaa ka dib marka Baarlamaanku dib ugu coddeeyo kuna oggolaado aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) ee tirade guud ee Baarlamaanka.

Madaxweynaha dhowaan la dooran doono waxaa laga rajeynayaa inuu mudnaan gaar ah siiyo sharci dejinta. Waa in la qiro in affarti sano ee ugu dambeysey la dejiyey tira sharciyo ah oo aan yarayn. In kasta oo dhinacaas horumar laga gaarey, waaya aragnimana laga kasbaday, haddana marka laga eego dhinaca tayada, mid kasta oo ka mid ah sharciyada rasmi ahaan dhaqangalka noqoday waxaa ku badan qodobbo dastuurka laga soo minguuriyey. Sharciyada noocaas ahi waxay xad-gudub ku yihiin mabaadiida sharci dejinta oo ay ka reebban tahay in la simo dastuurka oo ah darajada koowaad, iyo sharciyada oo ku jira drajada labaad ee qaanuunka. Tan labaad waxaa laga baaqsanayaa muhimadda sharciyada oo ah in laga helo tafaasiisha arrimo dastuurku dhinaca mabaadi'ida guud ka abbaaray.



**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Ayada oo la tixgelinayo baaxadda hawlaha Madxweynaha u yaal, iyo mudnaanta ay leedahay in dalku uu helo sharciyo la saanqaadi kara dadaalka dawlad dhisidda, waxaa loo baahanyahay khubaro ku xeel-dheer xeer-dejinta guud ahaan iyo gaar ahaan arrimaha kala gaarka ah ee sharciyadu kala khuseeyaan sida maaliyadda, cashuuraha, ganacsiga (gudo iyo diabadba), deegaanka iwm. Xafiiska la talinta sharci-dejinta madaxtooyada wuxuu mudanyahay in loo huro hanti, aqoon iyo agabka kale ee lagama maarmaanka u ah.

**(ii) Awoodda Madaxweynaha ee la Xariirta Magacaabidda Madaxda Sare eee Dawladda**

Mansabyada Madaxweynuhu magacaabo waxay ku cad yihiin Qodobka 90-aad ee dastuurka, waxaana ka mid ah "Taliyayaasha Ciidammada Heer Federaal iyo ka qaadista xilalkooda, markii ay soo jeediyaan Golaha Wasiirradu." (Qod. 90. C); "Jagooyinka sare ee Xukuumadda Federaalka iyo madaxda Hey'adaha Dawladda Federaalka, marka uu soo jeediyo Golaha Wasiirradu." (Qod. 90. k); iyo "Jagooyinka Danjireyaasha iyo Qunsuliyadaha guud, markuu Golaha Wasiirradu soo jeediyoo". (Qod.90. L).

Xikmadda ka dambaysa in Madaxweynuhu yeesho awoodaha kor ku xusan waxay daawa ka tahay in ay sugnaato in mas'uulka la magacaabayo uu mutaystay xilka loo magacaabayo. Golaha xukuumadduu marka uu Madaxweynaha u jeediyo magacaabid la xariirta xilalka kor ku xusan, waxaa muhiim ah in ay la socoto warbixin tafaftiran oo sababaynaysa in shakhsiga loo soo gudbiyey uu yahay qofka ugu habboon oo xilkaas qaban lahaa. Sidaas awgeed Madaxweynuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu su'uaalo ka weydiiyo Rai'iisul Wasaaraha, oo ra'ayi ka dhiibto, amaba hor-istaago asaga oo go'aankiisa raaciniya qoraal sababaysan. Haddii awoodda Madaxaweynaha ee la xariirta magacaabidda mas'uuliyiinta ay tahay mid maamuus ah amaba ogeysiin ma jirteen sabab loogu daro dastuurka. Marka hay'adaha iyo masu'uuliyinta leh soo jeedintu sii ogyihiin in Madaxweynuhu u adeegsanayo awooddisa sida ay tahay, waxaa la fili karaa in qudhoodu si taxaddar leh uga fiirsadaan soo jeedintooda, ayaga oo ku sii tala gelaya in Madaxweynuhu hor is taagi karo haddii ku arko goldaloolooyin.

Sababta dastuurku Madaxweynaha u siiyey go'aanka kama dambaysta ah ee la xariira magacaabidda madaxda sare ee dawladda, waxay dammanad u tahay inuu hubiyo in mas'uuliyadda ugu sarreeya hay'adaha Qaranku ay buuxiyaan sharuudaha ku aaddan xi-gudashadooda ayada oon loo eegin qaddarin kale nooc kasta oo ay tahayba. Madaxweynuhu wuxuu xilkaas asaga ah u gudan karaa sida ay ku jirto danta dalka, isla markaasna waafaqsan talinta sharciga markaa aanu dan shakhsi ah ka lahayn amaba aanu u nuglaan cadaasiyo dhinacyo kale kaga yiimaada sida dhacda marka madaxweynuhu aanuu daacad ahayn amaba shakhsi ahaantiisa isku kalsoonayn.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

**5. Mideynta Shacabka iyo Dalka**

Khudbaddii Madaxweynaha Jabbuutii 20 ki Agoosto 2000 ka jeediyey munaasabaddii Caleema Saarka Xukumaddii Qaran ee Ku-Meel-Gaarka aheyd, waxaa ka mid ahaa dardaaran oraneyey, **"Waxaa la idiin doorrtay dal kala jajabay, jab walbina meel ka dhacay. Waxaa la idinka sugayaa in aad jababkaa dib isugu keentaan, Ka dibna dib loo dhiso".** Madaxdii maalintaas xilka loo dhaariyey iyo kuwii ka dambeeyey, iskuma deyin in ay dib isugu keenaan jababkii bilawgii 1991-kii ay dawladnimadii Soomaaliya u kala finiintay iyo shacabkii u kala miirmay degaannadii ay u kala badnaayeen waayihii ka horreeyey qabsashadii gumeystayaashi shisheeye.

In kasta oo rubuc qarni in ka badan laga joogo shuf-beeliddi dawladdi Soomaaliya, waxaa ayaan darro ah in aan marna la isku deyin in Shacabka isku dhinac loo dumo. Mabad'iida asaasiga ahaa ee uu ku dhaadanayey dhaq-dhaqaaqi Gobonnima Doonka Soomaaliya, wuxuu ahaa Waddaniyad. Wacyigi waddaniga ahaa oo ku dhisnaa ol'olayaashi gobonnima doonku wuxuu abuuray himilo qur ah oo dulucdeedu tahay in laga xoroobo gumeyste shisheeye lana yessho dawlad Qaran oo la mid ah kuwa dunida ka jira. Fiditaanki wacyigii waddaniga ahaa ee xawliga lahaa waxaa barbar socdey sii daciifiddi wacyigi qolannimada. Nuxurka dhabta ee suurta geliyey in lagu guuleysto madaxbannidi dalka iyo hanashadi dawladdii Qaran wuxuu ahaa wacygii waddaniga ahaa.

Casharrada laga dhaxlay taariikhda waxaa ka mid ah in ummad kasta ay marar ka mid ah jiritaankeeda la soo gudboonaaddaan marxalado ay mutaan qalalaase bulsho, laga dhaxlo tacaddiyo ay isla bulshadu isu geysato. Isla casharada taariikhda waxaa kalo ka mid ah in laga soo kaban karo dhibaatada, lana hanan karo midnimo iyo higsasho horumar iyo baraare. In ummadi kasoo kabaneyso qalalaase bulsho dhexdeeda ah amaba in ay iska xorayneyso dulleyn gumeysi waxaa la filan karaa marka la arko saansaan horudhac ah oo ka horreeya. Saansaanka dib-u-fufidda qarannimada waxaa ka mid ah in ummadi ku baraarugto himilo ay ku midaysantahay wax walba oo lagu gaari karona u hurto ayaga oo sida ul iyo diirkeeda ah.

Dhinac walba oo laga eego, dib u hanashada dawlad dhammaystiran, waxaa lagu naalloon karaa marka la arko saansaan cusub oo uu ka muuqdo wacyigii waddaniga ahaa oo dib u soo fufaya. Wacyiga waddaniga ah ee marxaladda hadda la faca ahi ma noqon karo mid lagu bartilmaameedsanayo gumeysi shisheeye. **Baraarugga wacyiga waddaniga ee hadda shinkiisi kal-galay, wuxuu ka beermi karaa**: **wada-xaajood dhab ah oo horseedi kara in la isla meel-dhigo nooc dawladeed oo uu shacabka Soomaaliya wadar ahaan isugu raaci karo.**

Horseedidda talinta sharciga ka sokow, Shacabka Soomalia wuxuu Madaxweynaha dhowaan la dooran doono ka filayaa inuu dalka ku hoggaamiyo tubtii dib lagu hanan lahaa dawladnimo dhammays ah. Haddii Madaxwenaha la doorto uu xoogga saaro saddex baarnaamij oo iskaabaya, EEBBENA la kaashado, waxaa hubaal ah in la gaari doono guulo la mahadiyo. Saddexda barnaamijba waxay la xariiraan is-waafajinta himilada shacabka iyo dadaalka dawlad sameynta ee Ha'yadaha Qaranka. Saddexda barnaami oo isu dhan waxaa loogu magacadari karaa:


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

**Siyaasadda Cillad-Saaridda Qarannimada.** Siyasadda Cillad-Saarida Qaranka waxa ka mid noqon kara saddex barnaamij oo ku kala beegan: **(i) cillad-saaridda xasaradaha ka jira Dawlad-Goboleed Gudaheed; (ii) Cillad-Saaridda Dawlad-Goboleedyada ka dhex jira; iyo (iii) Cillad-Saarida Dawladda Dhexe iyo Dawlad-Goboleedyada.**

**(i) Cillad-Saaridaa xasaradaha ka jira Dawlad Goboleed gudaheeda;**

Soomaalidu waxay tiraahdaa *Geed walba in gudbta ayaa hoos taal*. Dawlad goboleedyada qaarkood kuma dhalan go'aanno ay u dhanyihiin dadka ay khusayso. Inkasta oo Puntland ay ka dhalatay go'aan wadareeed loo dhanyahay, waxaan la iska indhasaabi karin in qaar ka mid ah shacabki dhidibbada u taagey, ku quus gaabanyihiin in maamulka Puntland uu u jiro danahooda. In shacabka la isugu dumo jahada qarannimada waa in ay hor iyo horraan ka hanaqaaddo heerka DG-yada iyo heerarka ka hooseeya.

**(ii) Cillad-Saaridda xasaradahaha ka jira Dawlad Goboleedyada dhexdooda**

Abaabulidda DG-yadu waxaa la oran karaa waxay ka tarjumeyaan Jababkii dalku u kala Jajabay sidaas awgeed lalama yaabi karo in dhexdooda ay ka jiraan xasaradihii ummadda kala geeyey. Dhinac kale marka laga eego, ma muuqato qaab kale oo ban ka uun ah oo hadda fal-gal noqon kara. Arrinta maangalka ah oo hadda furan waa in la isku dubbarido barnaamij siyaasadeed iyo bulsho oo xal u noqon kara aakhirkana lagu maarayn karo qaddiyadaha DGyadu isku-seeganyihin amaba isku-seegi karaan. Heer kasta oo xallinta khilaafaadka waxa horumar laga gaari karaa marka biya dhacoodu yahay caddaaladda.

**(iii) Cillad-Saaridda Xiriirrada dawladda dhexe iyo Dawlad Goboleedyada**

Waxaa jira tabashooyin ku kala dhex jira dawladda dhexe iyo dawlad GByada. Xiriirrada labada dhinac guud ahaan waxay isla falgelid xasilloon yeelan karaan marka lagu guulaysto dastuur qaran oo kama dambays oo si cad u qeexa sida awoodaha iyo xilalku ugu kala qaybsanaanayaan labada heer. Isla dastuurka qaran waa inuu xeeriyo qaabka sharciga ah ee lala tiigsanayo mararka ay dhacdo in khilaafyada qaarkood lagu xallin waayo qaabab siyaasadeed ama sulux ah.

Kartida hoggaaminta ee uu la imaandoono madaxweynaha la doorto waxaa lagu cabbiri doonaa hadba inta ay gaarto kalsoonida shacabka ee la xariirta wel-welka laga qabo in dib loogu simbriiraxdo jn awoodda oo dhammi ku ururuto dawladda dhexe. Tubta yagleelidda dawladnimo dhammayas ah waxaa kaloo kala dhantaali kara in DG-yadu joogtaystastaan awoodo iyo xilal dawladda dhexe keliya u bannaan isla markaasna aanay talada u daadjin heerarka degmooyinka. **Madaxweynaha dhowaan la dooran doono ma noqon doono mid ka soo dhaalaala hoggaaminta Soomaliya u horseedi doonta dawlad dhammaystiran haddii uu (sida kuwi asaga ka horreeyey) xiriirro aan sinnayn la kala yeesho DGyada iyo guud ahaanba shacabka Soomaaliya.**


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

## 6. Abaabulidda Ra'ayi Caam ah

Xaaladda hadda Soomaaliya ka jirta ma jiro Ra'ayi caam ah oo ka baxsan xayndaabka qabaa'ilka oo marka hoos looga dhaadhaco haybta guud, oo qudhiisu sii kala qaybsama. In kasta oo guulo laga gaaro dadaallada la xariira Talinta Sharciga iyo turxaan bixinta laga abaabulo heerarka maamullada ay tahay bilaw wanaagsan iyo ifafaale hoggaan wacan, haddana waxaa laga yaaba in aaney yeelan saameynta loo baahanyahay, dhinaca kor u qaadidda wacyiga, haddii aan la barbar wadin abaabul Ra'ayi caam ah, oo aan ku sar-go'onayn xayndaabyada qolannimada iyo weegaarrada maamullada.

Ra'ayi-yada hadda kaalintoodii bannaantahay waxaa ka mid ah ra'ayi ka tarjumaya dano xalaal ah oo ay wadaagaan dad kala heyb ah, isla markaana aan ku xadgudbayn danaha caamka ah ee qarannimo. Danaha ay wadaagaan kooxo bulsho oo aan ku dhisnayn qolannimo waxay hanaqaad noqon karaan marka ay jirto dan qaran oo ka dhex muuqata hannaan dawladnimo oo ay u dhanyihiin sharciyaddii iyo awooddihi dawladnimo.

Sidaas awgeed, Madaxweynaha la dooran doono waxaa laga filayaa inuu u soo bandhigo barnaamij isku dubbaridan ujeeddadiisuna tahay abaabulidda faagaarayaal uu ka soo bixi karo Ra'ayi caam ah oo u qareemaya qarannimada, kuna mintidaya hanashadeeda iyo taabba gelinteeda. Qaybha bulshada ee Ra'ayiga caamka ee qarannimada hibanaya waa badanyihiin waxaanse tusaalle u soo qaadan karnaa: **(i) Hoggaanka dhaqanka,** (ii) **Aqoonleyda furuucda kala geddisan ee cilmiga, iyo (iii) Warbaahinta.** Sababta aan saddexda qeybood tusalle ugu soo qaadannay waxay la xariirtaa, sida wax ku oolka ah oo ay u bacrimin karaan isu soo duwidda ra'ayiyada hadda farraarrada bixiyey ee shacabka Soomaaliya ku kala tagsanyahay.

### (i) Hoggaanka dhaqanka

Haggaanka dhaqanku laba kaalimood ayuu bulshada kaga jiraa. Kaalinta koowaad oo ah hoggaanka beelaha, waxaa u wheliya inay yihiin keydka dhaqanka Soomaaliyeed. Sidaas awgeed isu soo dabbaalidda ra'ayiga hoggaanka dhaqanku wuxuu saameyn toos ku yeelanayaa turxaan bixinta is-qoonsiga ku dhex baahsan beelaha Soomaaliyeed.

### (ii) Aqoonleyda furuucda kala geddisan ee Cilmiga

Turxaanta ka dhex aloosan shacabka Soomaaliya waxay ka dhex muuqataa aqoonleyda Soomaaliya. Dooddaha ka dhex dhisaalan aqoonleyda, waxaa ka mid ah aragtida ay ka kala qabaan nooca ay noqondoonto dawladda Soomaaliya ee ka dambayndoonta dawladnimadii jiritaan beeshay 1991-dii. Guud ahaan laba xero ayaa loo kala saari karaa. Safka koowaad wuxuu u qareemaa nooca dawladnimada ee loo yaqaan Federaalka.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Safka labaad waxaa la moodaa inuu weli hibanayo dawlad dhexe oo talinta dalku ku kooban tahay dawlad dhexe. Madaxweynaha la dooran doono, waxaa laga filayaa inuu aqoonleyda Soomaaliya dhex dhigo xujada ah: sidee loo amba qaadaaa geeddi-sococd ka bilawda maraxaladda hadda Soomaaliya ku sugantahay, kuna intihooda dawladnimo dhammaystiran? Iyo maxaa la qaban karaa affarta sano ee soo fool leh; si loogu gogol xaaro higsiga dawladnimo dhammaystiran? Waxaa la filikara in dood daah furan oo lagu lafagurayo mustaqbalka iyo isbarbar dhigidda daraasadaha aqoonleyda ay ka soo bixi doonto aragti bar-kulan u noqon kartaa fikradaha lagu kala tagasanyahay.



**(iii) Warbaahinta Xorta ah**

Waxaa hubaaal ah in saxaafadda xorta ah iyo Madaxweynaha la dooran doono aaney col noqondoonin, haddii Madaxweynaha cusubi ka taxaddaro in aanu falin wax mudan in la isku dhaleeceeyo. Haddii Madaxweynaha la doorandoono isku darsado tala qaadasho, go’aan gaarid iyo hagar bax, isla markaasna uu garwsado waxna ka qabto dhaliilaha laga arko xilgudashadiisa, inti suura gal ahna wax ka qabto. Waxaa hubaal ah in wax kasta oo ay faafiyaan saxaafadda baas abuurka ah, aan aqlabiyadda shacabku dheg u jalaq siin doonin.

Madaxeynaha la doorandoono waxaa laga filayaa inuu ka yax-yaxo in la faaniyo, dadka oo dhan (oo ay ku jiraan ardayda oo laga soo jafo fasalladoodii) dibadda la soo taago ayaga, oo durbaanno iyo heesa ammantiisa ah ku soo dhoweeya markuu booqdo meel dalka ka mid ah iyo markuu caasimadda dib ugu noqdo labadaba.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved



Marka warbaahinta dawladdu noqoto mid la lug qaadda sii dhoweynta iyo soo dhoweynta Madaxweynaha, wararka rasmiga ah ee dawladdu noqon maayaan kuwa dadku xiiseeyo. Marka ay dhacdo in wararka dawladda ka soo baxaya iyo nolosha shacabku kala noqdaaan sidii lagu misaaley **Dibiga Doollod** oo la yiri, "**Dhegihiisu wax fiican bey maqlaan indhihiisuse ma arkaan",** dadweynuhu wuxuu u dheg taagaa ceeb ka sheegaa dawladda, jabaq kasta oo la maqlana waa la is wada gaarsiiyaa a ayada oo la sii tarmiyey, xataa haddii aanaey sal iyo baar lahayn, halkaasna ay ka dillacdo in dawladda iyo warbaahinta xorta ay is collaystaan.

Madaxweynaha la dooran doono waxaa laga filayaa inuu noqdo mid aamminsan in sida ugu habboon oo loo yarayn karo xasarad ka dhex abburanta warbaahinta xorta iyo dawladdu waa ayada oo xil-gudashada dawladduu noqoto mid daahfuran wax qabadkeeda iyo xaaladda dalkana ka run sheegta.

Wixii intaas ka soo hara, Madaxweynaha la dooran doono waxaa laga filayaa inuu gacan ka geysto sidii warbaahinta xorta ahi u noqon lahayd mid xilkas ah, tabar iyo tayana u leh in ay kaalinta kaga beegan ka qaadato abaabulidda iyo horumarita wacyi caam ah oo waddani ah.

## 7. Afeef

Madaxweynaha shanaad ee dhowaan la dooran doono ma aha in laga filo inuu noqdo qof mucjiso ah, oo bogsiiya wax kasta oo uu kala tabanayo shacaba Soomaaliya muddo affar sano ah


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

gudahood. Waxa ugu weyn oo laga fili karo kama cusla waxa uu kari karo qof kasta oo ka damqanaya dacdarrada shacbka Soomaaliya dalka gudihiisa iyo dibaddisiba ku haysata.

Waxaa la fili karaa in haddii Madaxweynaha la dooran doono uu isla helo samaha uu la naawiliyo shacabka Soomaaliya iyo inuu nasiib u yeeshay mansabka Madaxweynaha ee ah kan ugu sareeya talada dalka, uu ka soo dhalaali doono xilka saaran. Madaxweynaha la dooran doono waxaa laga filayaa inuu noqodo tusaalle habboon oo kasbada in lagu daydo. Shacabka Soomaaliya waxaa hubaal ah in ay bara dheerandoonaan dadaalka uu la yimaado hoggaanka Qaranku.

W.Q. Axmad Cabbaas Axmad (Gacma Gaab)
Email: abbassone@yahoo.com
----------------

*Cabbaas Axmad waxa uu barre sare ka ahaa Jaamacadda Ummadda, Kuliyadda Dhaqaalaha 1979 -1981, waxa uuna ka mid ahaa gudiggii farsamo ee loo xilsaaray qorista dastuurka KMG ee Soomaaliya.*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**